ICRC

SOOMAALIYA

# HOWLAHA MUHIIMKA AH

MAAJO 31, 2020




## XAKAMEYNTA FAAFITAANKA COVID-19

Cudurka saf-marka ah ee Covid-19 waa xaalad caafimaad oo degdeg ah iyo dhibaato bani'aadamnimo labadaba. Kuwa horeyba u haysatay waxyeellada rabshadaha iyo dhibaatooyinka cimilada, Covid-19 ayaa khatar dheeraad ku ah noloshooda, caafimaadkooda iyo hab-nololeedkooda. Baahida dadka Soomaaliyeed u qabaan kaalmada iyo dhowridda ayaa weli ah mid aad u tiro badan. ICRC oo si dhow ula kaashanaysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa waxay si dhakhso leh u dhaqan gelisay hawlaheedii bani'aadamnimada ah si ay wax uga qabato xaaladda oo dhammaystiraysa jawaab-celinta mas'uuliyiinta Soomaaliyeed iyo hay'adaha kale ee caalamiga ah iyadoo la dhowrayo mabaadi'da aasaasiga ah ee dhexdhexaadnimada, eexasho la'aanta ah iyo madaxbanaanida. Waxay sidoo kale abaabuleen si loo ilaaliyo caafimaadka shaqaalahooda hadana loogu oggolaado inay sii wadaan howlahooda bani'aadamnimada ah, iyadoo isla mar ahaan taana la yareynaayo halisaha wax ku biirin kara sii faafitaanka fayraska.

ICRC-du waxay dhaqan gelisay jawaab-celinteeda iyada oo barnaamijyada jira la waafajinayo ka jawaab-celinta xaaladda degdegga, ah iyo sameynta barnaamijyo cusub labadaba si wax looga oo wax looga qabto baahiyaha gaarka ah kuwaas oo la soo baxa cudurka saf-marka ah. Hawlaha bani'aadamnimda ee ICRC oo wax looga qabanaayo loogana yareynaayo cawaaqibka ka dhasha colaada iyo musiibada dabiiciga ah ayaa sii soconeysaa in laga hirgaliyo meel kasta oo suurtagal ah. Qaar badan oo ka mid ah howlahaan sida dadaallada dhaqaale-yar yar, taageerada hab-nololeedka ama helitaanka biyo iyo caafimaad ee meelaha fogfog ayaa wali ah qayb muhiim u ah taageerida dadweynaha Soomaaliyeed inta lagu sii jiro dhibaatada.

# XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA

## ILAA IYO BILOWGII DHIBAATADA, GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS (ICRC) WAXAY LA SHAQEYNEYSAY URURKA BISHA CAS EE SOOMAALIYEED (SRCS).




- In laysla wadaago maclumaadka saxda ah ee COVID-19 iyo sida dadku ay uga hortegi lahaayeen naftooda iyo qoysaskoodaba cudurka. waxaa ka mid ah fariimaha raadiyayaasha, kulamo kooxeedyo yar-yar oo heer bulsho ah, oo ay ka mid yihiin degaanada barakacayaasha, boorarka macluumaadka lagu qoro, iyo sidoo kale qaybinta qalabka gacmo-dhaqida, alaabta nadaafadda iyo qalabka ka hortagga faafida fayraska.
- In la kormeero xaaladda xabsiyada dhexe in wada hadal ku saabsan u diyaar garowga iyo tallaabooyinka wax ka qabashada potential dillaaca lala galo mas'uuliyiinta khuseysa, in la siiyo taageero farsamo iyo qalab si kor loogu qaado ka hortagga cudurka iyo tallaabooyinka xakameynta, in maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiga la siiyo macluumaad ku filan oo ku saabsan ku dhaqanka fayo-dhowrka habboon iyo sidoo kale saabuun iyo waxyaabaha kale ee loo adeegsado fayo-dhowrka iyo nadiifinta ama qalabka jeermis dilaha ah.
- In xarumaha caafimaadka iyo heerarka isbitaallada laga abuuro hababka baaritaanka aasaasiga ah si loo hubiyo in kiis la tuhunsan yahay ama la xaqiijiyay uu galo dhismayaasha iyadoo la talinnada caadiga ah iyo hawlgallada la sii wadaayo, in laga caawiyo dabagalka iyo raadraaca kiisaska looga shakiyey, in lagu taageero aasaasidda meelaha go'doominta ah ee xarumaha caafimaadka oo loogu talagalay xaaladaha dhex dhexaadka ah iyo kuwa daran (oo aan ahayn 5% ee u baahan doona mashiin neefsi), si ay mas'uuliyiinta u siiyaan hagitaan iyo talooyin iyo xarumaha cilmibaarista oo dadka dhintay si sharaf leh loo maamulo.
- Sii wadida taageerida xiriirka qoyska ee muhaajiriinta, barakacayaasha iyo maxaabiista kuwaas oo aan ka faa'ideysan karin booqashooyinka qoyska.
- In laga taageero dhaqaalaha iyada oo loo sii marayo habka lacag u qaybinta bulshooyinka aadka u nugul oo ku sugan meelaha aan ka shaqeyno.



## ADKEYNTA KA HORTAGGA IYO KU DHAQANKA NADAAFADA WANAAGSAN EE BULSHADA DHEXDEEDA

Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas (SRCS) waxay gaarayaan bulshooyinka oo ay ku jiraan dadka barakacey si looga hortago faafida COVID-19 gudaha meelaha ay ka shaqeeyaan **29-ka** xarumood ee Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) ee Banaadir, Jubbaland, Koonfur Galbeed, Hirshabele iyo Galmudug oo ay taageerto Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC). Somaliland iyo Puntland, Ururka Bisha Cas (SRCS) waxay hawlo la mid ah ka hirgelinaysaa **42** xarumo caafimaad oo kale oo Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) oo ay taageerayaan xubno kale oo ka socda Dhaqdhaqaaqa Laanqaytra Cas iyo Bisha Cas.


- Farriimo idaacadeed oo ay baahiyaan maalin kasta **12** idaacadood dalka oo dhan ah si ay ugu gudbiyaan bulshada farriimaha ka hortagga. Iyada oo loo marayo Xarunta Xiriirka Bulshada (373) **721** qof ayaa la gaarsiiyay macluumaad ku saabsan farriimaha ka hortagga.
- **417** mutadawiciin oo ka tirsan Ururka Bisha Cas iyo **413** shaqaale caafimaad oo ka shaqeeya Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah ayaa lagu tababarey fariimaha ka hortagga COVID -19, **785** shaqaale caafimaad oo ka shaqeeya Isbitaallada Madiina, Keysaney, Baydhabo iyo Kismaayo ayaa sidoo kale loo tababaray.
- **40,101** kulan oo dhiirigelinta caafimaadka ah ayaa lagu caawiyey **382,369** qof oo ku kala nool Banaadir, Jubbada Hoose, Gedo, Hiiraan, Shabeellaha Hoose, Shabeellaha Dhexe, Galgaduud iyo gobollada kale. **2,904** kulan oo heer isbitaal ah ayaa la qabtay waxaana la caawiyey **22,696** qof.
- **285,969** xabbo oo saabuun ayaa loo qaybiyey bulshooyinka.

Iyada oo loo maraayo hawlaheeda kor u qaadida fayo-dhowrka bulshada,ICRC iyo Ururka Bisha Cas iyo kooxahooda mutadawiciinta ah waxay sameeyeen booqashooyin guryaha ah, iyagoo bixinaya macluumaadka ka hortagga, saabuun iyo kaniiniyada koloriinka ah.Ololeyaasha dhiirrigelinta nadaafadda bulshada ee dhulka fog ayaa la qorsheynayaa in ay daboosho in ka badan **156,000** qoys (**930,000** qof) oo ku nool meelaha webiyada maraan.

- **56** Mutadawiciin Bisha Cas ayaa loo tababaray faafinta dhiirri gelinta nadaafadda iyo farriimaha ka-hortagga COVID-19 ee Baardheere, Ceel waaq iyo Dhoobley

- **8,055** qoys (**48,330** ka faa'ideystayaal) degmada Baardheere, **4,992** qoys (**29,952** kafaa'iideystayaal) degmada Ceel waaq, **3,500** qoys (**21,000** kafaa'iideystayaal) Dhoobley iyo **6,524** qoys (**39,144** ka faa'ideystayaal) Afgooye ayaa la siiyey saabuun iyo kaniiiniyada koloriinka ah oo ay weheliso buug yareyaal ka hortagga COVID-19 ah.
- Xeryaha barakacayaasha dalka oo dhan, **82** mutadawiciin Ururka Bisha Cas ayaa la tababaray, halka **2,985** kulan oo dhiirigelinta caafimaadka ah la qabtay, oo ay ka faa'ideysteen **29,580** qof, **38** xarumo gacmo dhaqasho ayaa la sameeyey, **25,714** xabbo oo saabuun ah ayaa la qaybiyey.
- Mutadawaciinta Dib-u-soo Celinta Xiriirka Qoyska (RFL) ee Ururka Bisha Cas ayaa si dulmar ah loo gaarsiiyey farriimaha ka hortagga si ay ugu dhiirrigeliyaan ka faa'ideystayaasha, agab dhiirrigelin caafimaad ayaa loo qaybiyey **6** degaan barakacayaal oo ku yaal Muqdisho iyo **3** magaalada Baydhaba. goobaha gacmadhaqida (**300** liitar) haamaha biyaha ayaa xero kasta lagu rakibay. **400** barakacayaal ah ayaa ka faa'ideysanaya tas-hiilaadka nadaafada aasaasiga ah iyo wicitaano taleefan RFL oo lacag la'aan ah.
- Goobaha gacma-dhaqashada ayaa lagu rakibay **3** xafiis oo Bisha Cas ah ah oo jidka socdaalka ee Somaliland, Puntland, iyo sidoo kale meelaha laga soo galo ee dadka ku soo noqday dhulkooda ee dekedaha Berbera iyo Boosaaso. Kooxaha RFL waxay ku qalabaysan yihiin waxyaabaha nadaafada aasaasiga ah si loo hubiyo sii wadidda bixinta adeegyo taleefan RFL oo lacag la'aan ah.

## KA HORTAGGA FAAFIDA CUDURKA EE MEELAHA XABSIYADA AG




Si lix bilood loo daboolo baahidooda, guud ahaan Soomaaliya, **24** xabsi ayaa dhammaan maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiyada loo qaybiyey alaabo nadaafadeed oo ay ku jiraan xabsiga dhexe ee Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, Garoowe iyo Hargeysa.

- Kulamada macluumaadka ka hortagga COVID-19, oo ay la socdaan boorar iyo alaabo kale ayaa la siiyey maxaabiista, shaqaalaha xabsiga iyo maamulayaasha.
- Saabuun ayaa loo qaybiyey in ka badan **4,550** maxbuus iyo **1,000** shaqaale xabsi ah.
- In ka badan **100** meel oo gacmo dhaqashada ayaa loo qalabeeyay si loo hubiyo in maxaabiista iyo shaqaalaha xabsigu ay heli karaan waqti kasta.
- **44,868** saabuunta dharka ah, **11,250** kiilo Omo dharka lagu dhaqo ah, iyo sidoo kale agab kale oo nadaafadeed iyo qalab ayaa la siiyey. In ka badan **1,600** maaska la xirto ah iyo **300** oo galoofiska gacmaha ah ayaa la bixiyay. Intaa waxaa sii dheer, **700** oo waji-bixin wajiga laga soo saaray iyo agab loogu talagalay **200** oo gaashaamo wajiga lagu ilaaliyo ah ayaa lasiiyay Xabsiga Dhexe ee Garoowe.
- Taleefano iyo SIM kaaro ayaa la siiiyey si loogu ogolaado maxaabiistu in ay xiriir joogto ah la yeeshaan qoysaskooda halkaas oo booqashada qoysaska la hakiyey.
- Talooyin qoraal ah oo looga hortagayo faafitaanka fayriska iyadoo la ixtiraamayo sharafta maxaabiista ayaa loo gudbiyay mas'uuliyiinta maxaabiista heer dhexe iyo mid goboleedba.

## TAAGEERIDA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA

- **29** xarumood oo daryeelka caafimaadka aas-aasiga ah (PHC) ah ayaa loo sameeyey **30** meelood oo gacmaha lagu dhaqdo halka in ka badan **36,000** liitar oo koloriin ah loo isticmaaley ujeeddooyin Jeermis dilid ah iyo **78,156** xabbo oo saabuun ah la qaybiyey.
- Meelaha dadka lagu kala saaro oo aasaasi ah oo ka faa'iideystayaasha laga baaro ayaa la abuuray, waxaana lagu aasaasay **29** xarumo caafimaad oo daryeelka caafimaadka aas-aasiga ah (PHC) ah, halka shaqaalaha Bisha Cas (SRCS) iyo mutadawiciinta loo tababaray inay taageeraan kormeerka bulshada iyo raadraaca kiisaska looga shakiyey, Isbitaallada Kismaayo iyo Keysaney ayaa loo diyaariyey **10** sariirood iyo **15** sariirood oo loogu talagalay baaritaanka iyo go'doominta.
- Iyadoo loo maraayo Xarunta Wicitaanka ICRC ayaa waxaa la sameeyaa raadraaca kiisaska looga shakiyey. **335** xiriiro lala xiriiriyey **139** kiis oo laga shakisan yahay ayaa laga raadinayaa Muqdisho, Baydhabo, Kismaayo, Baardheere, Ceel waaq, Balcad, Beledweyne iyo degaanno kale.

- Baydhabo, Kismaayo iyo Keysaney isibitaaladooda Teendhooyin ayaa loo dhisi doonaa si ay u taageeraan kiisaska dhex-dhexaadka ah iyo kuwa aadka u daran ee COVID-19 laakiin ma ahan **5%** kiisaska waxay u baahan doonan mashiin neefsi, qaabka xakamaynta cudurka, maaraynta kiisaska iyo tababarka qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed (PPE) ayaa waxaa la siiyey isbitaallada, iyadoo ay weheliso agab caafimaad, daawo iyo qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed (PPE) madaxda kalkaaliyeyaasha caafimaadka iyo kalkaaliyeyaasha macallimiinta ah ayaa sidoo kale loo tababaray maaraynta dadka dhintay.

## JOOGTAYNTA WAXQABADYADA KOR U QAADA ADKEYSIGA DADKA

- Lacago deeq ah oo ujeedooyin kala duwan leh ayaa loo qeybiyey **16,935** qoysaska nugul ah oo ku kala nool Garasbaley iyo Kaxda, Wanla weyn, Xamar Weyne, Baardheere, Dayniile, Cadaado, Diinsoor, Qandala, Lasquorey iyo Hobyo. Dheeri ah **3,000** oo qoys oo ku nool meelahaas ayaa la caawin doonaa toddobaadyada soo socda.

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Maajo 2020

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_afrique
blogs.icrc.org/Somalia

2020.1277/002;402